# 12

# Masruufka Sayga

SOM 012

XEERKA QOYSKA IYO DUMARKA DEGGAN ONTARIO

## Dumarka oo dhan.
## Hal Sharci oo Xeerka Qoyska ah.

Ogoow xuquuqdaada.

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

# Masruufka Sayga

*Buugan yar waxaa loogu tala galay in lagugu siiyo warbixin gaaban oo ku saabsan arrimaha khuseeyo sharciga. Xogtan ma lagu beedeli karo xogta gaarka ah iyo caawinaada qofka loo fidiyey oo sharciga ku saabsan. Haddii arrintaada ay khuseyso sharciga xeerka qoyska, raadso la talin sharci ah sida ugu dhaqsiyaha badan si xaqaada aad u dhacsato. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan sida aad u heli lahayd qareenka arrimaha xeerka qoyska, lagacna aad u siin lahayd, ka fiiriso buugeena yar oo ku magacaaban "sida aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska" oo ku qoran shabakadda www.onefamilylaw.ca.*

## Waa maxay masruufka sayiga?

Masruufka sayga waa lacagta uu bixiyo labada guurka ku kala tagay midkood, ee uu siiyo kan kale, marka uu xiriikooda dhamaado ka dib. Masruufkan waxaa loogu tala galay in lagu caawiyo qofka dhaqaale ahaan liita. Qofka bixinaayo lacagta waxaa la yiraahdaa "**bixiye**". Qofka la siinaayana waxaa la yiraahdaa sayga **ku tiirsane** ah.

Masruufka Lacagta la bixiyo waxay noqon kartaa mid tiro badan oo hal mar la bixiyo, ama lacag joogta ah oo bilwalba la bixio, ama mid ku siman waqti la xadiday.

Lacagta masruufka loo bixiyo waxay quseyneysaa lacagta canshuur celinta sanadka aad sameyso. Haddii aad bixiso lacagta masruufka sayiga, caddeyntan waxaad u isticmaali kartaa canshuur celinta sanadka lagaa qaadi lahaa in lagaa dhimo. Haddii aad qaadatid lacagta masruufka sayga, waa in aad sheegtid marka aad canshuurta sanadlaha ah xareeyneysid si loogu xisaabtamo dakhli ku soo galay ahaan.

Haddii adiga iyo saygaada aad kala tagtaan, waxaad labadiinaba gaari kartaan heshiis ku saabsan masruufka. Uma baahnidiin in aad qabsataan qareen si aad u qorataan heshiiskaan. Haddii aad isku afgaran weydaan heshiiska, ama heshiiskiina uu dhaqan galiwaayo, waxaad weydiisan kartaa maxkamada in ay amarto bixinta masruufka.

Haddii uu reerka haysan lacag fara badan, waxaa laga yaabaa in maxkamaddu ay ku adkaato in ay bixiso amarka masruufka ku aadan. Sharciga wuxuu mudnaan siinayaa in marka hore la bixiyo masruufka caruurta. Maxkamadu waxay kuu tixgelineysaa in lagu siiyo masruufka sayga haddii qofka aad kala tagteen loo arko in lacag fiican u soo hartay marka la bixiyey masruufkii caruurta.

## Yaa codsan kara masruufka sayga?

Waad codsan kartaa lacagta masruufka sayiga haddii aad guur sharci ah isku qabteen adiga iyo saygaadii hore. Sidoo kale, waad codsan kartaa lacagta masruufka haddii add saygaada ku wada joogteen nooca loo yaqaan wada noolaashaha oo uu sharciga waafaqsanyahay.

Sida *Sharciga Xeerka Qoyska* uu qeexayo wada noolaasho waxaa loo yaqaan marka:

- adiga iyo jaalkaada aad wada nooshihiin ugu yaraan seddax sano oo joogta ah, ama
- adiga iyo jaalkaada in aad si joogta ah u xiriirtaan oo aadna isu dhasheen canug ama aad wada korsateen
- Sayigaada wuxuu noqon karaa lab ama dheddig.

## Maxay maxkamadahu u amraan bixinta masruufka sayga?

Guurku haddii uu idlaado, waxaa dhici kara midkiin in uu ka dhaqaale fiicanyahay midka kale. Taa waxaa sababi kara sida aad xilka guriga u kala qaadateen kolkii aad wada joogteen. Tusaale ahaan, haddii aad guriga joogtay si aad u xanaaneyso caruurta dhaqaalahaada wuu ka yaraanayaa midka sayga kale ee soo shaqeeyey. Waxaa dhici kartay in aad shaqo lacag yar ah ku shaqeyso si aad fursad u siiso saygaada in uu waxbarto si uu berrito u helo shaqo fiican.

Haddii ay arrimahan oo kale dhacaan, maxkamaddu waxay go'aamini kartaa in uu saygaada ku siiyo lacag masruuf ah ilaa iyo in muddo ah kolka uu xiriirkiina guurka ah idlaado. Taa macnaheeda ma ahan in aan loo baahneen in aad wax qabsato oo aad is nooleyso. Maxkamaddu waxay kaa fileysaa in aad wax qabsato inta awoodaada ah oo aad ka madax banaanaato saygaadii hore.

## Goormee ayey maxkamadaha amraan bixinta masruufka sayiga?

Sharciga wuxuu farayaa maxkamadaha in ay tixgeliyaan arrimo fara badan kolka ay kuu go'aaminayaan bixinta masruufka sayga. Arrimaha tixgelinta mudan waxaa ka mid ah:

- intee muddo ah ayaad is qabteen ama wada nooleeydeen adiga iyo saygaada
- muxuu midkiinba reerka soo geliyey muddadaas
- haddii aad horey u haysatay amar ama heshiis ku saabsan bixinta masruufka, sida heshiiska qoyska

In uu lacagta masruufka bixiyo iyo inta uu bixin lahaa kuma xirna dabeecadda uu leeyahay saygaada.

## Waa maxay arrimaha ay tixgelinta siiyaan maxkamadaha kolka ay go'aaminayaan in la bixiyo lacagta masruufka sayga ah?

Arrimaha uu sharciga faraayo in ay maxkamadaha tixgelin siiyaan kolka ay go'aaminayaan in uu saygaada bixiyo lacagta masruufka waxaa ka mid ah:

- intee lacag ah ayuu qof kasta haystaa ama uu shaqeysan karaa
- intee muddo ah ayaad is qabteen ama wada nooleydeen
- da'daada iyo caafimaadkaada
- imisa ayaad la imaan kartaa si aad u noolaato;
- saygaadii hore ma awoodi karaa lacagtan masruufka ah
- intee muddo ah ayey qaadaneysaa si aad madax banaani u gaarto iyo immisa ayey ku kaceysaa
- maxaad ku taageertay saygaada si uu u gaaray heerka uu hadda joogo iyo dhaqaalaha uu haysto
- cidda u baahan in aqalka uu la joogo canug
- nooca daryeelka caruurta uu midkiinba u qaabilsanaa inta aad wada joogteen
- xilka guriga kaa saarnaa iyo guurkiina sida uu wax ugu dhimay dakhligii ku soo geli lahaa

Haddii aad codsaneysid in lagu siiyo masruufka sayga, waxaad xaq u leedahay in aad ogaato dhaqaalaha uu leeyahay saygaadii hore. Arrintan waxaa lagu magacaabaa **soo bandhigidda dhaqaalaha**.

## Intee ayey noqon kartaa lacagta loo bixiyo masruufka?

Waagii hore, sharciga ku saabsan masruufka sayga si fiican uma caddeyn. Maxkamadaha ka shaqeeya arrimaha qoyska ee Kanada ku baahsan siyaabo kala duwan ayey wax u go'aamin jireen oo ku aadan goorta ay khasab tahay in la bixiyo, inta la bixin karo iyo muddada ay soconeyso bixinta. Si sharciga mid siman looga dhigo, Wasaaradda Cadaaladda waxay soo saartay buuga **Tilmaan Bixiyaha Masruufka Sayiga** (SSG).

Buugan (SSG) wuxuu qeexayaa qiyaasta lacagta ah ee ugu badan ama ugu yar oo qofka la siin karo marka waxyaabo badan la tixgeliyo. Qiyaasta lacagta waxay ku xirantahay muddada aad wada joogteen, inta caruur ah ee aad leedihiin, nooca shaqada uu qofkiinba soo qabtay iyo inta lacag ah uu qof kasta shaqeeyey. Tilmaan bixiyahan mid tilmaantiisa ay sharci tahay ma ahan, hasayeeshee qareenada iyo qaaliyada sida ay u badanyihiin wayka qiyaas qaataan.

## Yaa hirgelinaayo xukunka bixinta masruufka sayiga?

Xukunka bixinta masruufka sayga waxaa hirgelinaayo **Xafiiska Waajibaadka Qoyska [Family Responsibility Office** (FRO)**]**. Waa isla xafiiska dowladda dhexe oo u xilsaarnaa fulinta xukunka masruufka caruurta. Xukun kasta oo ku saabsan masruufka sayga waxaa si toos ah looga diiwaan geliyaa xafiiska FRO. Haddii adiga iyo saygaadii hore aad go'aan isla gaartaan waa in aad nuqul go'aankaas ku saabsan siisaan xafiiska FRO si loo hirgeliyo.

## Sidee ayuu u shaqeeyaa xafiiska FRO?

Kolka xafiiska FRO la soo gaarsiiyo amarka xukunka, ruuxa bixiyaha ah waa in uu lacagta u soo gudbiyaa xafiiskan. Marka xafiiskan FRO uu lacagta gacanta ku dhigo wuxuu uu soo gudbin doonaa sayga qaataha ah.

Xafiiska FRO wuxuu maamulaa qoysas fara badan. Sidaa darted bacdamaa uu xafiiskan howlo badanyahay waxaa laga yaabaa in aad sugtid lacagtaada muddo bilooyin ah.

## Maxaa dhacaya haddii bixiyaha uu bixin waayo lacagta?

Mararka qaar waxaa dhacda in bixiyaha uu ka daaho bixinta ama uu gafo bilooyin. Haddii ay taasi dhacdo xafiiska FRO si uu lacagta ku helo wuxuu sameyn karaa:

- Haddii uu qofkaas shaqeeyo, madaxdiisa ayaa laga codsanayaa in lacagta masruufka laga jaro mushaarka qofka.
- Haddii bixiyaha uusan shaqeynin ama iskii uu u shaqeysto, xafiiska FRO wuxuu isku dayayaa in uu koontada bangiga qofkaas uu si toos ah ugala baxo lacagta masruufka. Arrintan waxaa lagu magacaabaa **faragelinta** ruuxa koontadiisa bangiga. Xafiiska FRO wuxuu kaloo sameyn karaa in uu ka xannibo iibista handida uu leeyahay ruuxaas sida iibista baabuurkiisa ama gurigiisa. Haddii uu qofkaasi isku dayo in uu iibiyo hantidiisa, xafiiska FRO wuxuu halkaa kala baxayaa lacagtii ruuxaas lagu lahaa.
- Haddii uu bixiyaha uu yahay ruux had iyo jeer la daaha lacagta ama lacag tiro badan lagu leeyahay, xafiiska FRO wuxuu isku dayayaa in uu ka xannibo shattiga baabuur wadidda iyo shaddiyada kale sida midka ugaarsiga iyo kaluun dabashada. Baasaboorka ayaa laga nasakhi karaa. Lacagta uu qofkaasi dowladda ku leeyahay ayaa laga qaadan karaa sida lacagta canshuur celinta ama lacagta shaqo la'aanta loo siiyo (employment insurance benefits).

## Maxaa dhacayo haddii bixiyaha uusan ku nooleyn gobolka Ontario?

Xafiiska FRO wuxuu kaa caawini karaa in uu bixiyaha ka soo qaado lacagta masruufka haddii uu ku noolyahay meel kasta oo ka mid ah waddanka Kanada ama Mareykanka. Taasi waxaa suuro gal ka dhigeyso heshiisyada ka dhaxeeyo gobollada Kanada oo idil iyo Mareykankaba oo u suuro gelinaayo in xafiiska FRO ka soo uruuriyo lacagta xitaa haddii xadka laga gudbo. Gobolka Ontario wuxuu heshiis kaa la mid ah la leeyahay dowladaha Bermuda, Ghana, Hong Kong, the Czech Republic iyo United Kingdom.

Haddii waalidka bixiyaha ah uu ku noolyahay waddan aan heshiis la lahayn gobolka Ontario, xafiiska FRO ma jirto wax uu ka qaban karo xoojinta xukunkan. Sida kali ah oo wax looga qaban karo arrintan waxay tahay in la tiigsado sharciga waddankaas u degsan.

*Haddii aad tahay qof dumar ah oo ku hadasho luqadda fransiiska oo ku nool gobolka Ontario, waxaad xaq u leedahay in laguugu adeego luqadda Fransiiska kolka ay maxkamadda xallineyso arrimaha xeerka qoyskaada. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada, kala xiriir ruux qareen ah, xarumaha adeega arrimaha sharciga khuseeya, ama khadka taakuleynta Femaide 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.*

*Xogwarran dheeraad ah oo ku saabsan sida aad ku heli lahayd adeega luqadda Fransiiska ah ka fiiri shabakadda www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.*

## Mawduucyada Xeerka Qoyska oo diyaarka ah:*

1. Siyaabaha kale ee lagu Xallin karo Khilaafaadka iyo Xeerka Qoyska wuxu ka qabo (SOM 001)
2. Badbaadada Caruurta iyo Xeerka Qoyska (SOM 002)
3. Masruufka Caruurta (SOM 003)
4. Xeerka qoyska iyo kan Dambiyada (SOM 004)
5. Xannaanaynta iyo ka Warqabka Caruurta (SOM 005)
6. Heshiisyada Qoyska (SOM 006)
7. Gar-qaadida Xeerka Qoyska (SOM 007)
8. Xeerka Qoyska sida uu u quseeyo dumarka Soo galootiga ah, kuwa Qaxooyiga ah iyo kuwa aan Sharciga lahayn (SOM 008)
9. Sidii aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska (SOM 009)
10. Sharciga Xeerka Qoyska sida uu u Qaybiyo Hantida reerka (SOM 010)
11. Guurka iyo furidda (SOM 011)
12. **Masruufka Sayga (SOM 012)**

** Buugan waxaa la heli karaa asagoo noocyo kale ah ama luqado kale ku qoran. Fadlan eeg shabakadda www.onefamilylaw.ca si aad u hesho warbixin dheeraad ah. Websaaydkeena waxaad kaloo ka heleysaa buugag badan oo kaa caawinaayo sida aad u aqoonsan lahayd xaqaada ku qoran sharciga xeerka qoyska.*

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Funded by: / Financé par : Ontario

Xogwarranka ku qoran qoraaladan waa aragtida hay'adda FLEW sidaa darted dowladda Gobolka mas'uul kama ahan nuxurka qoraaladan.